

# Talosiinta jimicsiga ee kooxda yar

Sida adiga ay kula tahay nololmaalmeedkaaga caadiga ah, ma waxaad samaysaa jimicsi aad u yar? Ma kuula muuqataa in aad dooneyso taageero iyo warbixin la xiriirta sidii aad ku bilaabi lahayd qaab nololeed firfircooni leh?

Ujeedada laga leeyahay talosiinta jimicsiga waa sidii loo kordhin lahaa warbixinta la xiriirta jimicsiga iyo saameynta uu caafimaadka ku leeyahay. Waxaa intaas dheer in waqtiyada kulanka aan ka wadahadli doonno waxyaabaha kale ee saameynta ku leh nololwanaaga caafimaadka, sida muhiimadda ay leeyihiin raashinka iyo hurdada. Qayb ka mid ah talosiinta jimicsiga, waxaa si koox ahaan ah u sameyn doonnaa jimcsi.

**Waxaan sameyn doonnaa jimicsi fudud oo aad u fiican!**

Helsinki Liikkuu

www.hel.fi/maali
#HelsinkiLiikkuu

Helsinki



Adeegyada jimicsiga ee Helsinki waxaa ay qabanqaabiyaan kooxo yar oo ka kooban 3-8 qof oo la siinaayo talosiinta jimicsiga. Howshaan waxaa ay qaadanaysaa qiyaastii saddex bilood, waxaana ay ka kooban tahay laba kulan oo si khaaas ah qof walbaa uu ula yeelanaayo macallinka jimicsiga, iyo afar kulan oo qof walbaa uu si wadajir ah ula qaadanaayo kooxda. Waana in qofku uu inta ay howshu socoto oo dhan yimaadaa oo barnaamijka uu ku xirnaadaa. Adeeggu waa mid lacag la'aan ah.

Luqadaha adeeggu ku baxaayo waa luqadaha finishka iyo ingiriiska oo si fasiix ah loogu hadlaayo. Dumarka waxaa loo qabanqaabinayaa kooxo talosiinta jimicsiga oo iyaga u gaar ah, waxaana intaa dheer in ay jiraan kooxo furan oo dadka oo dhan logu talaggalay. Haddii aad xiiseyneyso talosiinta jimicsiga ee qaabkan kooxda ah, islamarkaana aad niyad wanaagsan u heyso sidi aad qaab nololeedkaaga wax uga bedeli lahayd, waxaad la soo xirirtaa macallinka jimcisga, isna soo diwaangeli!

**Hanna Marttila 040 6342426**
**hanna.m.marttila@hel.fi**

Helsinki Liikkuu

Helsinki

**www.hel.fi/maali**
**#HelsinkiLiikkuu**